

### STAR (Aqoonta Luuqada ee Caruurta ee STAR Akhriska STAR)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



### MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

Imtaxaanada Luuqada ee STAR (Imtaxaanka Caadiga ah ee Qiimaynta Akhriska) waa qiimayno kumbuyuutarka lagu sameeyo oo laga qaado ardayda si kali-kali ah, ayadoo koox yar ah, ama fasalka oo dhan. DPS waxay u adeegsataa hanaanada imtaxaanka ee STAR inay kucabirto heerarka guulaha laga gaaray Akhriska Ingiriiska:

1. Imtaxaanka Aqoonta Akhriska ee Caruurta ee STAR - kaasoo laga qaado wadanka oo dhana lagu magacaabo ardayda fasalka koobaad ee biloowga dugsiga ilaa fasalka 3aad
2. Imtaxaanka Akhriska ee STAR - kaasoo laga qaado wadanka oo dhana lagu magacaabo ardayda fasalka 1aad ilaa fasalka 12aad.

Imtaxaanka Aqoonta Akhriska ee Caruurta ee STAR iyo Imtaxaanka Akhriska ee STAR waxay buuxshaan shuruudaha Sharciga Colorado ee READ (Akhriska) waxaana loo adeegsadaa in lagu cabiro heerarka guusha ee akhriska ardayda iyo hormarka ay sameeyaan, in lagu baaro ciladaha dhanka akhriska ee ardayda, iyo in labadalo qaabka casharada loo siiyo. Macluumaadka aadka loosoo dhiraan-dhiriyay ee STAR waxaa loo adeegsan karaa in la abuur qorshaha caawimaada yoolka leh ee dhanka akhriska (Qorshayaasha READ) si loogu taageero ardayda heerkooda akhrisku aadka uga hooseeyo heerka fasalka.



### XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Sida kucad sharciga Colorado READ, dhamaan ardayda dhigata fasalada K-3 waa in lagu imtaxaanaa qiimaynta akhriska ee Gudigga Gobalku aqoonsanyihiin inta lagu jiro xiisadaha gaarka ah ee imtaxaanka. Imtaxaanada xiisadaha Sharciga READ waxaa lasameeyaa lix asbuuc xiliga dayrta, bartamaha sanadka, iyo xiliga gu'ga. Ardayda dugsiga barbaarinta waxay leeyihiin 30 maalmood oo dheeri ah si ay ugu dhameeyaan qiimaynta. Dugsiyadu waxay haystaa mudada oo dhan si ay ardayda u imtaxaanaan. Sida uuqabo sharciga gobalku, ardayda dugsiga barbaarinta ilaa fasalka sadexaad kuwaasoo keena heerka kahooseeya karitada aqooneed ee laga rabo waxay ubaahan yihiin inay maraan hal ilaa labo qiimayno dheeri ah si looxaqiijiyo heerkooda akhrinta.

### Qaybaha Imtaxaanka Sharciga READ:

Fasalka k – 12	Dabayaaqada Agoso – Dabayaaqada Oktoobar	Dayrta
Fasalka k – 12	Diseembar – Bartamaha Feebaraayo	Bartamaha Sanadka
Fasalka k – 12	Bartamaha Maayo	Gu'ga

Maalmaha imtaxaanka laqadaayo ayaa kaladuwanaa kara ayagoo kuxiran dugsiga. Si aad uhesho macluumaadka maalmaha gaarka ah ee ardaygaagu imtaxaanka galaayo, fadlan waydii macalinka cunugaaga.



## WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Halkaan waxaad kahelaysaa labo kamid ah buundooyinka ugu muhiimsan ee imtaxaanada STAR bixiyaan:

Buundada Lacabiray (SS) waxaa lagu saleeyaa adkaanta su'aalaha iyo tirada jawaabaha saxda ah ee ardaygu baxsho. Muhiim ayay utahay iskubarbardhiga aqoonta ardayda ee fasalada kaladuwan. Buundooyinka lacabiro waxay udhaxeeyaan 300 – 900 marka laga fiirsho Imtaxaanka Akhriska ee Caruurta ee STAR halka ay udhaxeeyaan 0 – 1400 Imtaxaanka Akhriska ee STAR.

Cabirka Boleeyda (PR) wuxuu muujiyaa halka ay ardaydu kageleen boqolkiiba wadanka oo dhan kuwaasoo helay cabirka buundo udhigata ama kahoosaysa buundada uu keenay arday gaar ah. Buundooyinka PR waa kuwo caadiyan loo cabiro waxayna udhaxeeyaan 1-99 boqolkiiba. Ardayga keena PR dhan 75 wuxuu la aqoon yahay ama kasii fiican yahay ardayda keena 75% ee dhigta isla fasalka ardaygaan wadanka oo dhan. Cabirka buundada ardayga boqolkiiba waxa lawaafajinayaa qaybaha soosocda ee aqoonta luuqada:

- Ku'eg/Kasareeya Cabirka laga rabo: Ardayda leh aqoon udhiganata heerka fasalka
- Taageer ubaahan: Ardayda keena heer kahoosaysa kan fasalka una baahan in caawimaad lasiiyo
- Caawimaad iyo Gacan siinta Degdega ah: Arday leh aqoon wax badan kahoosaysa heerka fasalka una baahan caawimaad wayn

Si aad uhesho macluumaadka gaarka ah ee buundada ardaygaaga, fadlan waydii macalinka cunugaaga



## SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Imtaxaanada STAR waxay macluumaad muhiim ah kabaxshaan dhibcaha buundooyinka si ay macalimiintu ugu adeegsadaan halista iyo wax kabadalka casharadooda. Buundooyinka STAR waxaa loo adeegsan karaa in lagu aqoonsado heerka akhriska ee ardaygaaga, lagu dajiyo yoolalka dhanka akhriska ee laxariira awoodaha iyo meelaha uu kuliito ardayga, in lagula socodo hormarka dhanka akhriska, in la abuuro caawimaado dhanka akhriska oo gaar ah, iyo in lagu go'aansho hadii cunugaagu ubaahan yahay taageero dheeri ah oo dhanka akhriska ah.



## WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

**Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada**

Booqo:

- [assessments.dpsk12.org](https://assessments.dpsk12.org)

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.